

# KU NOQO TOMMIE 3 TALAABO OO FUD-FUDUD UUN

## 1 SOO BUUXI CODSIGAAGA

Codsiyadayada khadka on line ka lagu buuxsho waxaa laga heli karaa shabakada [stthomas.edu/dfc/applytoday](https://stthomas.edu/dfc/applytoday), waxaana ku jira sedex curis oo gaagaaban iyo su'aalhood.

## 2 SOO GUDBI BUUNDOOYINKAAGA

Si aad u soo dhamaystirto codsigan, waa inaad soo gudbisaa buudooyinka tacliinta dugsiga sare.

## 3 CODSO GARGAAR DHAQAALE (FINANCIAL AID)

Soo buuxi Codsiga Lacag La'aanta ah ee Gargaarka Dhaqaale ee Dowlada dhexe bixiso ( Free Application for Federal Student Aid) ee loo soo gaabiyo (FAFSA); koodkayada iskuulada ee dowlada dhexe ee waa **002345**) ama MN codsiga la yiraa (MN Dream Act).



## U KUUR GAL AAD SHAKHSIYAN UGU KUUR GALAYSO HAWSHAYADA

Bal arag meesha aad u qaadi doontid tallaabada xigta Qabso balan aad ku booqanayso jaamacada: [stthomas.edu/dfc/visit](https://stthomas.edu/dfc/visit)

## Kuliyadu waxa ay tahay

Kuliyada Dougherty Family College kolka aad dhigaynayso waxa aad ka heli doontaa gargagar gacan qabad ah barayaal ka socda St. Thomas, waxaad ka qayb gali doonaa tababaro aad lacag ku qaadan, waxaad kaloo heli manfacyo badan oo kale maadaama aad qayb ka tahay Jaamadaca ugu weyn ee gobolka ee gaarka loo leeyahay. Manhajku waxa uu kuu diyaarin in aad si aan turxaan lahayn aad ugu gudubto kuliyada dowlada ama kuwa gaarka loo leeyahay ee Minnesota hadii aad go'aansato daba-galka kasbashada shahaado jaamacadeed (bachelor's degree). St. Thomas, hadii aanu nahay waxaa naga go'an in aan sugno in aad hesho wixii aalad ah ee aad u baahato si aad ugu najaxdo tacliintaada.

## Sharuudaha lagu galo kuliyada

Arday ka ahaanta kuliyada Dougherty Family College macnaheedu waa soo bandhig aad soo ban dhigi diyaar u ahaanta iyo qaabilida aad qaabili in aad u dhabar adaygto tacliinta adag ee kuliyada. Ardaydayadu waxay u baahan yihiin dhabar adayg, adkaysi iyo ka go'naan ay ka go'an tahay in ay gaaraan hadafyadooda

### Codsadaha ku haboon qaadashadu:

- waa in uu haysto Buundooyin Dhibcahooda Celcelisku yahay 2.5 ama ka sareeya (2.5 GPA) (lagama rabo ardaygu in uu qaato imtixaanka la yiraa ACT); iyo
- in uu muujiyo in uu qabo baahi dhaqaale uu u baahan yahay oo badan (tusaale ahaan, ka soo baxa sharuudaha xaq u yeeladka gargaraarka dhaqaale ee dowladu dhex e bixiso ee la yiraa Pell Grants iyoama gargaarka dhaqaale ee gobolka Minnesota uu siiyo ardayda dan yarta ah)

## Kharashka iyo Gargaarka dhaqaalaha

Kuliyada Dougherty Family College waxa ay ku dadaashaa inay fidiso tacliin la iska bixin karo kharashkeeda lana kala dooran karo, sidaa awgeed, waxaa laga yaabaa in ardaygu uu qaadato shahaado wax barasho oo labo sano ah (Associate of Arts) iyadoon wax amaaha ah oo badan oo lagu leeyahay aysan jirin. Kharashka iyo khidmadaha sannad dugsiyeedka 2017-18 waxaa lagu qiyaasay \$15,000. Kharashyo iyo Khidmado hoose - marka lagu dara taa deeqada laga filayo gobolka Minnesota iyo Dowlada dhexe, deeqada wax barasho ee kale iyo gargaarada ay bixiyaan shirkadaha waaweyni - weeye sababta ka dhigta khidmada Dougherty Family College mid hooseeysa: oo mar marka qaarkood noqon karta in ardayda qaarkeed ay bixiyaan khidmad ah \$1,000 sanadka oo dhan.

Kolka aad bilaabayso codsigaaga, nala soo xiriir hadii aad wax su'aal ah qabto. **[stthomas.edu/dfc](http://stthomas.edu/dfc) • (651) 962-6150 • [dfc@stthomas.edu](mailto:dfc@stthomas.edu)**

---

Jaamacada St. Thomas (University of St. Thomas) waa jaamacad dadka si sinaan ah wax u barta una shaqa siisa. St. Thomas si sharci darro ah cida uma midab takoorto oo uma diido hawlaha borogaraamyadeeda iyadoo diidmadaa lagu saleynayo jinsiyad, midab, caqiido, diin, qowmiyad, lab/dhadig, galmo, nooca qoys, naafanimi, da'da, guur, qaadashada gargaarada dowlada, sida cayrta xubinimo ama hawlo urur deegaaneed ka tirsanaan, akhbaar ku saabsan hiddaha ama wixii kale ee astaamo ah ay reebaan sharciyada quseeya arrimahaa **[stthomas.edu/eostatement](http://stthomas.edu/eostatement)**